



Ri, Eey iyo Sac

- ✎ Fabian Wakholi
- 👤 Marleen Visser, Ingrid Schechter
- 💬 Abdi Muse
- 💬 Somali
- 📶 Level 2







Ri, eey iyo sac baa waxay a haayeen saaxiibo isku wayn. Maalin maalmaha kamid ah waxay aadeen safar waxayna raaceen taksi.




Markay gaadheen dhammaadkii safarkooda,
darawalka ayaa weyiyay in ey bixiyaan nooligooda. Sici
waxuu bixiyay lacagtiisi.



Eeygi waxuu bixiyay xoogaa dheerad ah, sababtoo ah ma uusan haysan lacag sax ah.




Darawalka waxuu siin rabay eeyga baaqigiisa markay rida carartay ayadoon waxbo bixinin.



Darawalka aad buu u xanaaqay. Garrigii buu waday asagoo siinin eeygi baaqigiisi.



Taasina waa sababta xitaa maanta, eeyga uu ugu ordo gaadhiga si uu u qooraansado oo u helo darawalkii ka qabay baaqiga.



Rida waxa ay ka carartaa baabuurka xiinkiisa. Waxay kacabsi qabtaa in loo xidho bixin la aanta nooligi.



Saca na dan kamalahan markuu baabuur soo socdo.
Saca waxuu qaataa waqtigiisa si uu jidka u gudbo
sababtoo ah waxuu og yahay in uu bixiyay nooligiisi si
dhameystiran.



Storybooks Outline

global-asp.github.io/storybooks-outline

Ri, Eey iyo Sac

Written by: Fabian Wakholi

Illustrated by: Marleen Visser, Ingrid Schechter

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by [Storybooks Outline](https://global-asp.github.io/storybooks-outline) in an effort to provide children's stories in the world's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 3.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).